

KALA-GUURKA: BILOWGA HABBOON EE DUGSIGA

Xaashida macluumaadka loogu talagalay qoysaska

Markii adiga iyo ilmahaagu la qabsataan sannadkan, bilaabidda dugsigu waxay u e'gtahay mid muddo dheer ah. Bilaabidda dugsiga waxay noqon kartaa mid leh loolan iyo xiiso, xaashidan macluumaadkuna waxay bixisaa macluumaadka qaarkiis sida barnaamijka carruurnimada hore ee ilmahu uu u taageeri doono adiga iyo ilmahaaga u-gudbidda Dugsiga markii uu sannadku bilowdo.

Ilmahaagu mar hore ayuu bartay kala-guurada yaryar iyo kuwa waaweyn ee nolosha. Sida uu ilamahaagu ula fagalo beya'daha ku cusub/aad u-aqoon (tusaale, markaad aadaan fasax-weynaha, bilaabida childcare-ka ama kindhaha, aadidda meelaha lagu cayaaro, xataa ka-guuridda hal nashaad ama rootiin oo loo guuro mid kale) waxay siisaa sawirka sida uu ilamahaagu ula falgalayo xaaladaha cusub iyo sida ugu fiican oo loo taageero.

MAXAY BILAABIDDA HABBOON EE DUGSIGU MUHIIM U TAHAY?

Bilaabidda habboon ee dugsiga waxay horseeddaa natijjooyinka wax-barasho iyo fayoobida ee ilmahaaga inta lagu jiro xiliga kala-guurka iyo ka diba. Waxay ka caawinaysaa sii-socoshada wax-barashada iyo koritaanka ilmahaaga waxayna taageeraysaa inay dareemaan ammaan, isku-kalsoonni iyo ku xirnaan dadka cusub iyo goobaha.

KU-QOR ILMHAAGA DUGSIGA

Badiba dugsiyada hoose waxay carruurta qoraan Maarsa ee sannadka ka horeeya carruurtu markay dugsiga bilaabaan. Markaad ku qorto ilmahaaga dugsiga, waxaad ka faai'daysanaysaa fursadaha inaad wax ka sii ogaato dugsiga oo ku saabsanaa barnaamijyada iyo nashaadyada u-gudbidda-dugsiga. U-gudbidda ugu firfircoor waxay bilaabataa ka hor dhammaadka sannadka waxayna sii gaartaa ka dib maalmaha kowaad ee dugsiga.

.

BARNAAMIJYADA IYO NASHAADYADA U-GUDBIDDA-DUGSIGA

Ka-qaybgalka barnaamijyada iyo nashaadyada u-gudbidda-dugsiga waxay adiga iyo ilmahaaga ka caawinaysaa inaad heshaan garasho habboon ee waxa uu dugsigu yahay waxay kaloo abuuraysaa saaxiibtinimo ay la yeeshaan carruurta kale iyo qoysaska kuwaas oo dugsiga imaan doona.

TRANSITION LEARNING AND DEVELOPMENT STATEMENT (CADDAYNTA KALA-GUURKA BARASHADA IYO KORITAANKA)

Baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga wuxuu qori doonaa *Transition Learning and Development Statement* (Caddaynta Kala-guurku). Caddaynta Kala-guurku waxay soo koobaysaa ilmahaagu xiisahiisa, xirfadihiisa iyo kartidiisa. Waxay kaloo muujinaysaa itijaaha shaqsiyadeed iyo xeeladaha wax-baridda si uu dugsiga ilmahaagu iyo baraha bareebka uu si dhaqso leh u ogaado ilmahaaga uuna qorsheeyo barnaamijka barashada iyo wax-baridda ee ku habboon.

Haddii aad qorshaynayso inaad ilamahaaga u dirto adeegga Daryeelka Saacadaha Dugsiga Ka-baxsan (OSHC), Caddaynta Kala-guurka waxaa lala-wadaagi karaa adeegga OSHC sidoo kale. Caddaynta Kala-guurka waxay ka caawinaysaa bareyaasha OSHC inay qorsheeyaan danaha ilmahaaga iyo inay taageeraan sii-socoshada u dhaxaysa carruurnimada hore, dugsiga iyo OSHC.

Caddaynta Kala-guurka waxay kaa cawinaysaa inaad fahamto, taageerto, kala-xiriirto aad u qareento waxbarashada ilmahaaga maaddaama ay usoo-wareegayaan dugsiga. Waxaa lagu siin doonaa koobiga Caddaynta Kala-guurka oo buuxsan ee ilmahaaga.

Caddaynta Kala-guurka ee ilmahaaga waxaa ku jira macluumaad shaqsieed oo ku saabsan ilmahaaga, oo ay ka mid yihiin magaca ilmahaaga, taariikhda dhalashada iyo sawirka, iyo magacaaga iyo faahfaahinta xiriirkaaga, markii ay macquul tahayna, waxaa kaloo ku jiri doona magaca iyo faahfaahinta xiriirada ee xirfad-yaqaanada carruurnimada hore ee kale kuwaas oo taageeraya ilmahaaga.

Caddaynta Kala-guurka waxaa badanaa la qoraa Teeramka 4aad, hase ahaatee haddii uu ilmahaagu uu iin leeyahay ama daahidda koritaanka, baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga ayaa qori kara Caddaynta Kala-guurka ee hore qiyaas ahaan Juun/Luuliyo oo ah bilaabaha wada-

EARLY CHILDHOOD

hadalka adiga iyo dugsiga uu doortay ilmahaaga taas oo ku saabsan taageerooyinka ku-daridda loo baahan yahay.

Sababtoo ah wax badan ayaad ka taqaan ilmahaaga, gacansiintaada caddaynta waa mid qiimo badan. Waxaa lagugu casuumayaa inaad buuxiso qaybta Caddaynta Kala-guurka waxay dugsiga ka caawin doontaa inay ogaadaan siday kuu caawin karaan adiga iyo ilmahaaga si aad labadiinaba u heshaan bilowga wacan ee dugsiga.

Waxaa kaloo jira qaybta ay tahay inuu ilmahaagu soo buuxiyo (ayaco uu caawinayo qof weyn, kaas oo noqon kara adiga ama baraha caruurnimada hore). Qaybtan badanaa waxaa ku jira sawirid iyo diiwaanka waxa ilmahaagu ku xiiseeyo dugsiga iyo waxay u malaynayaan wax ku saabsan bilaabidda dugsiga.

SIDA MACLUUMAADKA LOOLA WADAAGO DUGSIGA ILMHAAGA

Laga soo bilaabo 2018kii, Caddaynta Kala-guurka ee ilmahaaga waa la buuxin doonaa, lala-wadaagi doonaa oo la kaydin doonaa ayadoo la adeegsanayo qalabka online-ka ah oo ku jira *Insight Assessment Platform* (oo ah marxalad online ah oo ay ku jiraan qalabka/aaladaha qiimaynta). Dhammaan macluumaadka ku jira *Insight Assessment Platform* waxaa si sugar loogu kaydiyaa Australia dhexdeeda.

Haddaba *Insight Assessment Platform* hore ayaa loogu adeegsaday dugsiyada dowladda Victoria waxayna u ogolaanaysaa dugsiyada inay abuuraan diiwaan sii-jiraya ee waxbarashada iyo horumarka ilmahaaga. Dugsiyada Kaatooliga iyo kuwa Madaxabannaan qaarkood waxay kaloo ka helayaan Caddaynta Kala-guurka ee ilmahaaga ayadoo loo maro *Insight Assessment Platform*, ama waxay heli doonaan koobi elektarooni ah ama mid warqad ku-salaysan oo ka socota adeegeena.

Wasaaradda waxbarashada iyo Tababarka (Wasaaradda) waxay qandaraas ku bixisaan qaar howlaheeda ah oo siisaa bixiyeysaasha adeega dibadeed. Markii ay taasi dhacdo, tallaabooyinka ammaanka macluumaadka ayaa wasaaraddu u baahan tahay ayadoo qayb ka ah habka qandaraaska. Wasaaraddu waxay samaysay qiimaynta saamaynta gaarka ah ee *Insight Assessment Platform* si loo hubiyo ku-dhaqanka Qorshaha Gaarnimada macluumaadka ee Wasaaradda www.education.vic.gov.au/Pages/privacypolicy.

Macluumaadka laga helay Caddaynta Kala-guurka iyo macluumaadka dugsi-ku-qoridda dugsiyada qaarkood

waxaa adeegsan kara Wasaaradda ujeeddooyin lasocosho iyo kuwo cilmi-baariseed. Macluumaadkaas waxaa loo gudbin doonaa qaab tirakoob (tus. tirooyin iyo garaafyo) mana magacaabayso carruurta shaqsiyadooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan *Insight Assessment Platform*, la xiriir Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka oo ah psts@edumail.vic.gov.au.

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Fadlan ka eeg www.education.vic.gov.au/transitiontoschool Dokumentigan waxaa lagu turjumey dhowr luqadaha bulshada ah kuwaas oo laga helo www.education.vic.gov.au/transitiontoschool.